(Dib loo eegay Abriil 2025)

Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Jadeecada Dadka Waaweyn

Su’aal	**Jawaabo**
Sideen ku ogaan karaa heerka tallaalkayga?	Macluumaadka tallaalka waxaa laga heli karaa kaarka tallaalka ee jaalaha ah. • Qof kasta oo ka weyn da'da 4 jir waa inuu qaataa laba dhoos oo ah tallaalka jadeecada, qaamoow-qashiinka iyo rubeelada (MMR). • Qof kasta oo da'diisu u dhaxayso 1 ilaa 4 sano waa inuu qaataa hal dhoos oo ah tallaalka MMR https://www.hamilton.ca/people-programs/public-health/vaccines-immunizations. Kaarkaaga tallaalka ku hayso boorsadaada, ama sawirkiisa ku hayso taleefankaaga, si ay kuugu sahlanaato. Waxaa kale oo aad geli kartaa websaydka Hamilton public health https://hph.icon.ehealthontario.ca/#!/welcome si aad dib ugu eegto diiwaanka tallaalkaaga ama aad ula hadasho dhakhtarkaaga. Dadka dhashay 1970 kahor waxaa loo arkaa inay leeyihiin difaac dabiici ah.
Maxaan sameeyaa haddii aan la i tallaalin ama aanan lahayn difaac oo aan la kulmo qof jadeeco qaba?	Qof aan la tallaalin oo ag joogay qof jadeeco qaba ama isla hal meel kula sugnaa qof ay ku dhacday jadeeco ama “ay soo gaadhay jadeeco”. Soo-gaadhistani waxay keeni kartaa infekshanka jadeecada 1-3 toddobaad kadib. Haddii ay ku soo gaadhay 1. Ka wac Hamilton Public Health Services lambarkan 905-546-2489 ama qaybta caafimaadka dadweynaha ee deegaankaagasida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah si aad wax uga weydiiso kalkaalisada caafimaadka dadweynaha khataraha iyo tallaabooyinka xiga.

	2. Ka fogow goobaha khatarta sare leh (sida isbitaallada, guryaha daryeelka muddada-dheer) oo la soco astaamaha iyo calaamadaha jadeecada 21 maalmood kadib laga bilaabo taariikhda aad u malaynayso inaad u dhowaatay qof jadeeco qaba.
Maxaan sameeyaa haddii la i tallaalay ama aan difaac leeyahay laakiin aan qaado jadeeco?	La soco astaamaha iyo calaamadaha jadeecada 21 maalmood kadib markaad qaaday. Waxaad sii wadan kartaa inaad tagto shaqada, dugsiga ama daryeelka maalintii.
Waa maxay astaamaha jadeecada?	Calaamadaha jadeecadu waxay biloowdaan 7 ilaa 14 maalmood kadib markay ay ag joogeen qof kale oo buka. Calaamadaha waawayn axaa ka mid ah: - Duuf - Qufac - Dareemidda daal ama qufac - Indho casaan ah oo qoyan - Dhibco yaryar oo caddaan ah oo ku samaysma afka iyo cunaha - Finan xuub leh oo ku faafa jidhka oo dhan (midabku wuu kala duwan yahay iyadoo ay ku xidhan tahay midabka maqaarka)
Sideen ku ogaan karaa haddii aan qaaday Jadeeco?	Haddii lagugu aqoonsado in jadeeco ku soo gaadhay, qaybtaada caafimaadka dadwaynaha ayaa samayn doonta mid, ama dhammaan, kuwan soo socda: • Inay ku soo wacaan si ay kuugu sheego inay kusoo gaadhay. • Inay kuugu soo diraan warqad gurigaaga haddii aan lagu soo gaadhi karin. • Inay u digaan bulshada iyadoo la isticmaalayo warbaahinta (TV-ga, raadiyaha, wargeysyada) haddii soo-gaadhista laga yaabo inay ka dhacday meel fagaare ah sida dukaamaysiga, isbitaalka ama makhaayadda.

Maxaan sameeyaa si aan u daryeelo qof gurigayga ka tirsan oo jadeeco ku dhacday?	Hubi in qofka qaba infekshanka jadeecada uu helo nasasho, cabbitaan oo sii daawo ka caawisa qandhada (acetaminophen ama ibuprofen). Qofka jadeecada qaba waa inuu guriga joogo. Ha tagin dugsiga, daryeelka maalintii ama shaqada ugu yaraan afar maalmood kadib markay finanku bilaabmeen. Waxaad ka bixi kartaa guriga shan maalmood kadib markay finanku bilaabmeen. Ha la wadaagin dadka kale koobabka wax lagu cabbo ama fargeetada iyo malqacadyada. Xiro maaskaro haddii aad awooddo. Su'aalaha gaarka ah ee ku saabsan maaraynta astaamaha ama daryeelka caafimaadka, la hadal/wac dhakhtarkaaga ama kalkaalisada. Dadka guriga jooga ee qaaday jadeecada waa inay la hadlaan bixiyahooga daryeelka caafimaadka si ay u ogaadaan haddii tallaalka ama daawada kahortagga ay ku habboon tahay.
Maxaan sameeyaa haddii qof gurigayga jooga laga baaray Jadeecada oo aan natiijada ku sugayo guriga?	Qof kasta oo sugaya natiijadiisa baaritaanka jadeecada waa inuu joogo guriga ilaa ay Caafimaadka Dadweynuhu ku soo wargeliyaan natiijada. Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku soo wici doona natiijadaada waxayna kaa caawin doonaan inaad go'aansato inta aad u baahan tahay inaad ka fogaato dadka kale. Waxa kale oo ay siin doonaan talo dadka aad la nooshahay iyo kuwa kale ee kugu xeeran.
Maxaan sameeyaa haddii aan u baahdo inaan arko dhakhtar?	Wac xafiiska dhakhtarka kahor intaadan booqan. Haddii aad tagto Waaxda Gargaarka Degdegga ah, isla markiiba u sheeg miiska diiwaangelinta haddii ay jadeeco kugu dhacday, lagaa helay jadeeco ama haddii aad u safartay meel ka baxsan Kanada oo aad leedahay astaamaha (kor lagu taxay).
Maxaan sameeyaa haddii aan u baahdo inaan aado qolka gargaarka degdegga ah sababo la xidhiidha jadeecada.	Haddii aad ku imanayso ambalaas u sheeg **kalkaaliyaasha caafimaadka** Haddii aad u malaynayso in adiga ama ilmahaagu aad qabto jadeeco ama aad ag joogtaan qof jadeeco qaba. Haddii aad timaadid Waaxda Gurmadka degdegga ah (ED) kaligaa, qof weyn oo la tallaalay ama difaac leh, waa inuu KELIGIIS yimaadaa isbitaalka si uu ugu sheego shaqaalaha in qof jadeeco qabo uu soo galayo. Ha keenin bukaanka jadeecada gudaha ilaa inta Waaxda

	Gargaarka Degdegga ah (ED) la wargelinayo oo ay u diyaargaroobayaan in la qaabilo
Maxaan sameeyaa haddii aan uur leeyahay oo aan qaaday Jadeecada?	Haddii aad qaaday jadeeco oo aad uur leedahay waa inaad hubisaa diiwaanka tallaalkaaga ama la hadal dhakhtarkaaga si aad u xaqiijiso inaad leedahay difaaca jadeecada. Dadka waaweyn ee dhashay wixii ka danbeeyay 1970kii waxay u baahan yihiin 2 dhoos oo tallaalka jadeecada ah si ay u samaystaan difaac cimrigooda oo dhan. Haddii aad uur leedahay oo aad qaaday jadeecada oo aan horay laguu tallaalin oo aanad hore u qaadin infekshanka jadeecada la hadal dhakhtarkaaga maadaama oo aad qaadan kartid daawayn ka hortag ah oo IV (xididka) ah si adiga iyo uurjiifkaagaba looga ilaaliyo infekshanka jadeecada.